



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Abril 15, 2021

Ku socota: Hay'adaha Maamulka Kiiska iyo Daryeel Bixiyayaasha ODDS
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Tallaalka Johnson & Johnson

ODDS waxay dadka la wadaagaysaa waxyaabo ka socda Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) oo ka saabsan go'aan lagu joojinayo isa siinta tallaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson iyada oo sababtu tahay ku dhawaaqis ay soo saareen Maamulka Cuntada iyo Daawooyinka ee Maraykanka (FDA) iyo Xarumaha la Dagaalanka iyo ka Hortagga Cudurka (CDC). Joojintani waxaa loo hirgeliyay si ay feejignaani ku dheehan tahay si CDC iyo FDA ay dib ugu eegis ugu ku sameyn karaan lix kiis oo ah xinjirowga dhiiga oo dhif ah oo ku dhacay lix haween ah, oo da'doodu u dhaxayso 18–48, ka dib markii lagu tallaalay tallaalka Johnson & Johnson.

Fadlan isticmaal waxyaahabani si aad wada hadal ula yeelato qof kasta oo ka tirsan adeegyadani oo qaatay tallaalka Johnson & Johnson oo ay dhici karto in uu walwal qabo. Daryeel bixiyayaasha iyo hay'adaha maamulka kiisku waa in ay wada hadal la yeeshaan qof kasta oo ka tirsan adeegyada oo qaatay tallaalkani sidoo kale ka feejignaadaan astaamo kasta oo suurtagal ah oo ku qoran waxyaabaha ku jira OHA.

- [SU'AALAHADA INTA BADAN LA IS WEYDIIYO: Maamulka Caafimaadka Oregon Wuxuu Si Degdeg ah U Joojiyay Isa siinta Tallaalka Johnson & Johnson](#) (luqaddo dheeraad ayaa dhawaan soo socda)
- Barta internet-ka OHA ee ku saabsan tallaalka Johnson & Johnson oo ku qoran [Ingiriisi](#) iyo [Isbaanish](#)

Waad ku mahadsan tihiin sameynta wax kasta oo suurtagal ah si aad u taageertaan caafimaadka iyo badbaadada.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.